

Saameynta SHIBA

Waa maxay SHIBA?

Barnaamijka Taageerada Faa'iidooyinka Caymiska Caafimaad ee Dadka Waayeelka ah (SHIBA) wuxuu bixiyaa la talin, ujeedo leh, iyo caymiska caafimaadka degaanka oo fool ka fool ah iyo taageero lacag la'aan ah oo la siiyo:

- Dadka haysta Medicare, iyo
- Qoysaskooda.

Dadku waxay qaadan karaan go'aano ay ka warqabaan oo ku saabsan caymiskooda caafimaadka iyaga oo caawimaad ka helaya la taliyaaal shahaado haysta.

La taliyayaasha iyo tabarucayaasha SHIBA:

- Waxay bixiyaan macluumaad ku saabsan Medicare iyo waxa ay yihiin qorshayaasha caafimaadka iyo daawooyinka la isku qoro ee jira.
- Waxay caawimaad ka geystaan rafcaanada iyo cabashooyinka.
- Waxay baraan sida loo ilaaliyo, loo ogaado loona soo sheego musuqmaasuqa Medicare, wax gasaarinta iyo xadgudubka.

Sanadkii 2021-kii,
waxaa jiray
877,232
qof oo ku nool Oregon oo haysta Medicare

Degaanka iyo dadka Medicare (ee diiwaan gashan)

Baker 5,085	Lake 2,281
Benton 17,250	Lane 89,247
Clackamas 86,325	Lincoln 16,870
Clatsop 10,686	Linn 29,903
Columbia 12,140	Malheur 6,300
Coos 20,537	Marion 65,625
Crook 7,181	Morrow 2,190
Curry 9,339	Multnomah 128,506
Deschutes 45,892	Polk 18,531
Douglas 34,297	Sherman 525
Gilliam 558	Tillamook 8,328
Grant 2,291	Umatilla 14,681
Harney 2,026	Union 6,464
Hood River 4,393	Wallowa 2,495
Jackson 57,627	Wasco 6,444
Jefferson 5,497	Washington 90,820
Josephine 26,863	Wheeler 504
Klamath 17,817	Yamhill 21,714

Waa maxay Medicare?

Medicare waa barnaamijka caymiska caafimaadka federaalka oo loogu talagalay:

- Dadka da'doodu tahay 65 jir ama ka weyn tahay
- Dhallinyarada qaarkood ee qabta naafanimada, iyo
- Dadka qaba heerka u dambeeya ee xanuunka kelyaha "end stage renal disease".

Qaybaha Medicare

- ama -

Medicare Asalka ah



Qaybta A:
Caymiska isbitaalka



Qaybta B:
Caymiska caafimaadka

Medicare Advantage



Qaybta C:
Medicare Advantage

Oo la helayo isaga oo leh ama aan lahayn caymiska daawada la isku qoro (Qaybta D)

Waxaad ku dari kartaa midkood ama labadoodaba ee hoose:



Qaybta D: Caymiska Medicare ee daawada la isku qoro



Caymiska Medicare ee dheeraadka ah (Medigap)

Caymiska labaad ayaa waxaa sidoo kale ku jiri kara:

- Faa'iidooyinka hawlgabka (tusaale PERS)
- COBRA (xaaladaha qaarkood)
- Tricare for Life (TFL) ama CHAMPVA
- Medicaid
- Indian Health Services (IHS)

SHIBA iyada oo la eegayo tirada

6 shaqaalaha gobolka

198 tabarucayaasha firfircoon

395 dhacdooyinka wacyigelinta iyo waxbarashada

12,384 saacadaha tabaruca la sameeyay

16,013 kulamada dhanka la talinta ee fool ka foolka ah

SHIBA.OREGON.GOV | 800-722-4134

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Fadlan la xirii Barnaamijka Taageerada Faa'iidooyinka Caymiska Caafimaad ee Dadka Waayeelka ah (SHIBA) **1-800-722-4134** ama email-ka: shiba.oregon@dhsosha.state.or.us. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.